



# ISU DIYAARI MAHIIGAANADA IYO DAADKA



**Ka eeg saadaasha cimilada si aad u ogaato roobabka culus ama roobabka soo socda muddo maalmo badan. Tilmaamahan waxay kaa caawin karaan inaad isu diyaarisid intayna biyuhu kicin.**

## Is Diyaarinta Qofka

- Isticmaal liiska Take Winter By Storm Checklist si aad u diyaariso agabka gurmada, oo ay ku jiraan raadiye, toosh, beetariyo dheeraad ah, agabka gargaarka degdegga ah, macluumaadka la xidhiidhka gurmada, biyo, iyo cuntada aan halaabin. Waxaad ka heli kartaa liis faahfaahsan bogga internetka [TakeWinterByStorm.org](http://TakeWinterByStorm.org).
- Hayso qalabka roobka, dharka biyaha celiya iyo dhar diiran oo dheeraad ah intaad joogtid guriga, shaqada, iyo gaadiidkaaga si aad u isticmaasho gurmada.

## Dareerinta/Carro Guurka

- Ka xaadh caleemaha iyo khashinka dareerinta duufaanta si ay u ahadaan nadiif loogana ilaaliyo biyaha ku soo fataha jidadka iyo burburka soo gaara hantida qofka leeyahay.
- Soo sheeg meelaha biyaha daadka ku dareeraan iyo jidadka sida ugu dhakhsaha badan.
- Hubso siyaasadda milkiilaha gurigaaga si aad u ogaato haddii la caymiyey waxyeelada biyaha duufaantu soo gaadhsiisay gurigaaga – haddayna jirin, tan ku dar caymiskaaga.
- Fiiri sasaanka biyaha duufaanka ee ku dareera taagyada ku dhaw gurigaaga, oo xasuusnaw meelaha biyaha socda ku kulmaan.
- Sare u qaad guriga si biyuhu uga fogadaan aasaaska iyo in masharaabta biyaha ka fageeyso guriga kuna toosiso siistemka dareerinta.
- Fiiri taagagga agagaarka gurigaaga haddii ay jiraan calaamado tilmaama dhaqaaqa dhulka, sida carro guurka yar, socodka xashka ama waliba geedaha qaloocan. La xidhiidh farsamada dhulka deegaanka ama injineerkaaga dhismaha si uu u go'aamiyo darnaanta dhibtaada.

## Fatahaadda

- Waxaad alaabta qaaliga ah dhigtaa khaanadaha sare marka aad dhigayso alaabta qolalka ka hooseeyo dhulka ama meelaha u nugul daadadka.
- Ka dheeraw qolalka ka hooseeyo dhulka uu daadku soo gaaro. Waxaa dhici karto in korontaa ku qabsatoama biyaha ku dhimatid.
- Waligaa baabuur ha ku dhex wadin biyo fadhiya ama ha ka wareeganin calaamadaha jidh xidhan.
- Haddii baabuurkaaga biyaha ku istaago, ka tag, una dhaqaaq meel. Waxay ku qaadan kartaa kaliya hal cag ama laba in biyaha socdo qaadaan baabuurka.
- Haddaad ku nooshahay agagaarka wubiyada taariikh ahaan soo fataha, diyaar u noqo fatahaadda wubiga. Diyaarso agabka gurmada si aad u qabsato ood una socoto haddii ay dhacdo daadgurayni.
- Ilaali ammaankaada. Haddii la soo saaro digniinta fatahaadda, si dhakhso ah dhul sare ugu bax! Raac tilmaamaha daadguraynta iyo tilmaamaha rasmiga ee kale xilliga ay socoto socoto gurmada fatahaadu, laakiin ha sugin iyaga haddaad u malaynayso inaad khatar ku jirto.
- Socodka ama ku ciyaarista biyaha fatahaadda waa khatar; waxaa lagugu mijo-xaabin karaa biyo lix inji qotodoodu tahay!
- Milkiilayaasha guryaha, kireysteyaasha iyo ganacsiyadu waa inay iibsadaan caymiska fatahaada.
- Haddii kuleyliya gaasta dabiiciga ku xidhanto fatahaadda, dami korontada kuleyliya ilaa biyuhu gadaal u noqdaan, tubooyinkana qallalaan.
- Haddaad uriso gaaska dabiiciga, guriga ama dhismaha uga bax si dhakhso ah oo wac danabka gaaska dabiiciga ama 911.
- Ogaysii danabka gaaska dabiiciga haddii fatahaaddu kuu keentay heerarka biyuhu inay ka kormaraan cabbiraha gaaska. Wakiil ka socda danabka ayaa u baahan doona inuu hubiyo cabbiraha iyo xukumaha ka hor intaan la isticmaalin qalabka gaaska.
- Hadday khasab noqoto inaad uga baxdo gurigaaga ama dhismahaaga fatahaadda, dami gaaska iyo korontada, haddaad, si ammaan ah, sidaa u samayn karto oo keliya. Tani waxay ka hortagi kartaa waxyeelo soo gaadha qalabkaaga gaaska iyo korontada.
- Wac danabka gaaska dabiiciga si aad ballan ugu qabato baaritaan lagu sameeyo sida qalabka gaaska dabiiciga u shaqeeyo kaddib markay qallaleen lana nadiifiyo meelaha agagaarka qalabka la saameyay.

**Marka ay da'aan roobabka culus, marka hore hubi ammaankaada. Kadibna hubi tan qoyska, asxaabta, iyo jaarka si aad u xaqiijiso inay FIICAN yihiin.**

